



Fahanka Dammaanadda(Bail) Iyo Bond-ka ee Kenya

Waa maxay Bail ama Bond?

Bail ama Bond waa heshiis oggolaanaya in qofka looga shakisan yahay dembi laga sii daayo xabsiga inta kiiskiisu socdo, iyadoo shardi laga dhigayo inuu maxkamadda yimaado marka loo baahdo.

Labadaba bail iyo bond waxay ujeeddadoodu tahay in eedaysanaha uu xor ahaado inta kiisku socdo, isla markaana la hubiyo badbaadada dhibbanaha iyo in habka caddaaladdu si sax ah u socdo.

Dammaanadda Saldhigga Booliiska (Police Bail)

Booliisku waxay sii dayn karaan qofka looga shakisan yahay dembi ka hor inta aan la geyn maxkamad.

Tani waxay dhici kartaa marka:

- Baaritaannadu wali socdaan.
- Dembigu uusan ahayn mid aad u culus.
- Qofka looga shakisan yahay uu oggolaado inuu ku soo laabto saldhigga booliiska ama maxkamadda marka loo baahdo.

Qofka looga shakisan yahay waxaa laga yaabaa in laga rabo inuu:

- Saxeexo foomka bail.
- Keeno dammiin (qof dammaanad qaada).
- Ku soo laabto taariikh gaar ah.




Bail Ama Bond Ee Maxkamadda

Marka qofka looga shakisan yahay uu ka soo muuqdo maxkamadda, qaadiga ama garsooruhu ayaa go'aamiya in la siiyo bail ama bond.

Maxkamaddu waxay tixgelisaa:

- Heerka culayska dembiga.
- Badbaadada dhibbanaha.
- Haddii eedaysanuhu faragelin karo markhaatiyada.
- Haddii eedaysanuhu ka maqnaan karo maxkamadda.



Shuruudo Caadi ah Oo Bail Ah

Haddii bail ama bond la bixiyo, eedaysanaha waxaa laga yaabaa in laga rabo inuu:

- Bixiyo lacagta bail/bond.
 - Keeno dammiin.
 - Si joogto ah uga warbixiyo saldhigga booliiska.
 - Ka fogaado inuu la xiriiro dhibbanaha ama markhaatiyada.
 - Ka soo qayb galo dhammaan dhageysiyada maxkamadda.
- Haddii shuruudahaan la jebiyo, maxkamaddu waxay:
- Joojin kartaa bail/bond-ka.
 - Amri kartaa in eedaysanaha la xiro.

Fariinta Muhiimka Ah

Warbixinta GBV ama SGBV waa xuquuq, waxaa-na dhibbanayaasha mudan ilaalin, karaamo, iyo caddaalad.



OUR CONTACTS

Refugee Consortium of Kenya

P. O. Box 25340-00603, Nairobi, Kenya

Email: info@rckkenya.org

Main Office, Kilimani, Nairobi:

Haki House, Ndemi Road, Kilimani, Nairobi

+254 733 860 669 / +254 720 943 164 / +254 20 208 8060

Mobile: +254716391412, +254703820361

Toll Free Line: 0800720868

Kakuma Office:

Compound 3, opposite UNHCR Compound

+254 701 414 978

Toll Free Number: 0800 720 262

Dadaab Office:

+254 703 848 641, 0705 862 534

P.O. Box 28, Dadaab, Kenya

Toll Free Line: 0800721692

Garissa & Mwingi Office:

+254 700 865 559

Mombasa Office:

+254 728 569283

UNHCR Kenya Helpline Toll Free Number: 1517

FIND US ON:

@RCKKenya @rckkenya

@RCK-kenya www.rckkenya.org

@Refugee Consortium of Kenya – RCK



SCAN THE QR CODE

Avec la participation de



**Maxaa Dhici Kara
Kadib Markii Kiiska
GBV/SBV LAGA
WARBIXIYO
SALDHIGGGA
BOOLIISKA?**



Maxaa Dhici Kara Kadib Markii Kiiska GBV/SGBV Laga Warbixiyo Saldhigga Booliiska



1. Soo Sheegidda Dhacdada

- Qofka dhibbanaha ah ama qofka wakiilka ah ayaa dhacdada ka soo sheega saldhigga booliiska.
- Booliisku waxay cabashada ku diiwaangeliyaan Buugga Dhacdooyinka (Occurrence Book – OB).
- Dhibbanaha waxaa la siiyaa (lambarka OB), kaas oo lagu raadiyo ama lagu daba galo kiiska.



2. Qaadista Qoraalka (Statement)

- Dhibbanaha wuxuu si faahfaahsan u sharxaa waxa dhacay.
- Sidoo kale waxaa la qaadi karaa qoraallada markhaatiyaasha.



3. Baaritaan Caafimaad

- Dhibbanaha waxaa loo gudbiyaa xarun caafimaad isagoo wata foomka P3.
- Dhakhaatiirta ayaa baara dhibbanaha si ay u diiwaangeliyaan dhaawacyada ama caddeymaha.
- Kiisaska SGBV sida kufsiga ama faraxumaynta carruurta, dhakhaatiirtu waxay isticmaalaan foomka Post Rape Care (PRC) si ay u qoraan natiijooyinka baaritaanka una ilaaliyaan caddeymaha.
- Warbixinta caafimaadka ayaa markaas loo gudbiyaa booliiska waxaana loo isticmaali karaa dacwadda maxkamadda.



4. Baaritaanka Booliiska

Booliisku waxay bilaabaan baaritaan ku saabsan kiiska.

Tani waxay ku jiri kartaa:

- Booqashada goobta ay dhacdadu ka dhacday.
- Wareysiga markhaatiyaasha.
- Ururinta caddeymaha.
- Qabashada tuhmanaha (haddii la aqoonsado).



5. Qabashada Tuhmanaha

- Haddii ay jiraan caddeymo ku filan, tuhmanaha waa la qaban karaa.
- Tuhmanaha waxaa lagu hayn karaa saldhigga booliiska inta baaritaanku socdo.



6. Diyaarinta Faylka Kiiska

- Booliisku waxay diyaariyaan faylka kiiska oo ay ku jiraan caddeymo iyo qoraallada markhaatiyada.
- Faylkaas waxaa loo gudbiyaa Xafiiska Agaasimaha Dacwad-oogista Dadweynaha (ODPP) si ay u eegaan.



7. Ku Soo Oogista Dacwadda Maxkamadda

- Haddii ODPP ay arkaan in caddeymo ku filan jiraan, tuhmanaha waxaa si rasmi ah loogu soo oogi doonaa dacwad maxkamadda.
- Kadibna maxkamaddu waxay bilaabaysaa habka dhageysiga dacwadda dembiga.

La Socodka Kiiska Tacaddiyada Ku Salaysan Jinsiga Ama Tacaddiyada Galmada



Badbaadayaasha ama wakiilladooda waxay la socon karaan kiiska iyagoo:

- Booqanaya saldhigga booliska iyagoo wata lambarka diiwaanka dhacdada ee booliska.
- Weydiinaya sarkaalka baarista kiiska halka uu marayo kiisku.
- Hubinaya in hadalkooda iyo kuwa markhaatiyaasha si sax ah loo diiwaangeliyey.
- Gudbinaya dhammaan caddeymaha muhiimka ah ee taageeraya kiiska.

Sidoo kale waa inay xaqiijiyaan haddii:

- Qofka lagu tuhunsan yahay falka la xiray.
- Faylka kiiska loo gudbiyey xeer-ilaaliyaha.
- Kiiska la geeyey maxkamad.

 **HOTLINES:**

- Refugee Consortium of Kenya (RCK)- 0800720868
- UNHCR- 1517
- National GBV Toll free Helpline - 1195
- National Gender and Equality Commission (NGEC)- 0800720187
- Kenya Police Emergency number – 999 / 112
- Child Helpline- 116



Hay'adaha bixiya gargaarka sharci ama ururrada taageera dhibbanayaasha ayaa sidoo kale ka caawin kara la socodka kiiska.

